


\$29 =

Raacitaan/fuulis aan
dhammaad la'hayn ee
xilliga xagaaga
[summer- ka] oo dhan!



Ku hel Sharciga Ardayga ee Xagaaga gaadiid raacida u qalanta xagaaga ee basaska iyo tareennada fudfud!

Arday kasta oo hadda ku jira fasalka 9aad - 12aad ee dhigta iskuullada ka qaybqaata waxay heli karaan basas iyo tareenno kasta oo ku raaci karaan ilaa \$3.25* oo waxaad raaci kartaa wakhti kasta inta u dhaxayso 5 a.m. ilaa iyo 10 p.m. maalin kasta oo toddobaadka ka mid ah. Sharciyada lagu raacayo waxay shaqeenayaan laga bilaabo 1da Juun ilaa iyo 3ta Siteembar.

Sidee baan mid ku helaa?

Laga bilaabo 15ka Maajo, booqo boggan metrotransit.org/summer-pass si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sharciga oo mid dalbo adiga oo kareed kaarka isticmaalaya. Waxa kaliya aad u baahan tahay waa magaca iskuulkaaga iyo lambarkaaga aqoonsiga ardayga.

Haddii lacag naqdi ah aad isticmaalayso, sharciga Ardayga ee Xilliga Xagaaga waxaad ka iibsan kartaa Xarunta [Metro Transit Service Center]. Wac 612-373-3333 ama booqo metrotransit.org/service-centers si meelaha lagu iibiyo aad u ogaato.

Ma qabtaa su'aal? Su'aashaada waxaa kaaga jawaabbaya khabiirro isu socodka gaadiidka. Na ga soo wac 612-373-3333.

Cunto bilaash ah xagaagan!

Ma og tahay inay jiraan meelo xaafaddaada ka tirsan oo laga bixiyo cunto bilaash ah oo la siiyo dhallinyar kastato ee jira 18 iyo ka yar inta lagu jiro xilliga xagaaga oo dhan? Intaa waxaa sii dheer, sharcigaaga Ardayga ee Xagaaga ayaad isticmaali kartaa si aad meesha ku tagto!

Si aad u hesho meelo laga bixiyo cunto bilaash ah inta xagaaga lagu jiro:

FARIIN QORAAL KU DIR

'Food' lambarkan 877-877

WAC 1-866-3-hungry (486479)

BOOQO 2harvest.org/summerfood



* Iooliga ka badan \$3.25, sida qaar ka mid ah safarrada Northstar, kaliya ku dar lacagta sharcigaaga kuugu jirto.

